ISAGOO ARKAY: Heshiiska lagu dhisay Beesha Ganacsiga Sokeeye ee Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika ee lagu galay Magaalada Lusaka ee Dalka Smbiya 21 Disambar, 1981, taariikhdaas oo Heshiiskaas uu saxeexay Madaxweynaha J.D. Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshada Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee la xiriirta Heshiiskaas ee 10 Juunyo 1982.

Wuxuu soo saarayaa Xeerka soo socda:

(Qod. 1aad)

Heshiiska lagu dhisay Beesha Ganacsiga Sokeeye ee Dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika ee lagu galay Magaalda Lusaka ee Dalka Sambiya 21 Disembar, 1981 waa la meelmariyay.

(Qod. 2aad)

Qodobada Heshiiska kor ku xusan iyo Brotokoolladiisa ku lifaaqani waxay ku yeelan doonaan dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci, waxayna ku dhaqan gelayaan sida waafaqsan Qodobka 50aad ee Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha J.D. Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dalka.

Muqdisho, 22 Juunyo, 1982

Decree No. 40 June 1982, Instrument of Ratification

Somali Democratic Republic

The President

HAVING SEEN : Article 67 paragraph 5, Article 82 Paragraph 4 and Article 72 paragraph 1 of the constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN : The treaty for the establishment of the Proferential Trade Area for Eastern and Southern African States concluded in Lusaka-Zambia on 21 December 1981 on which date the said Treaty was signed by the President of the Somali Democratic Republic.

TAKING NOTE : Of the approval of the Standing Committee of the People's Assembly of the sand treaty on 10 June 1982.

Here by promulgates the following Decree :

Article 1

The treaty for the establishment of the Proferential Trade Area for Eastern and Southern African States concluded on 21 December 1981 in Lusaka-Zambia is hereby ratified.

Article 2

The provisions of the above—mentioned treaty and its protocols annexed there to shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall onter into force in accordance with article 50 of the treaty.

Article 3

This Decree shall enter into force upon signiture by the President of the Somali Democratic Republic, and shall bublished in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 22 June 1982

(Major Goneral Siad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 41 taariikh Meelmarin Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Uururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA) kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka, xubintiisa 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharcigu tirsigiisu yahay, taariikh oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay iagama maarmaan tahay in Heshiiskaas la Meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah (IDA). kuna saabsan amaah Lacageed loogu tala galay Mashruuca Biyaha Xamr, laguna kala saxiixday Magaalada Columbia ee Walaadayaha Midoobay ee Mareykanka taariikhdu markay ahayd 26 Maajo 1982.

(Qod. 2aad)

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa J.D.S. astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Warqadaha meelmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree No. 11 Instrument of ratification.
Somali Democratic Rep. the Presidenti.

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 Poragrapsh (4) ond Article 72, Poragraysh 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The law on 22, the bese of which thepeople assembly has approved the Development Credit Agreement (Second Mogadishu water Supply Project).

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

Article 1

The Development Credit Agreement (second Mogadishu water supply project) between Somali Democratic Republic and International Development Associa tino, which signature took in COLUMBIA U.S.A., on 26 th mey1982.

Article 2

This agreement shall have the force of thelaw in the Territory of the Somlai Democratic Republic and will be imblemented on the exchange of ratification papars.

Article 3

This Decree shall enter into force upon signatuer by the president of the Somali Democratic Repyblic and shall be pubblished inthe Official Bulletin of the State.

Mgdishu 4 LUG. 1982

PRESIDENT OF THE S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 42 ee 16 Feb.1982 Ruqso Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 6 ee 31.12.1969kii ee saameeya xaqa iyo Gunnada Ciidamada Qalabka sida (Pension and gratuity).

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Ciid.A12.8 ee 15.2.1982.

WUXUU XEERAY

(Qod. 1aad)

In Gaashaanle Dhexe Axmed Maxamed Halac oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed laga ruqseeyo Shaqada Ciidanka Boliiska karti darro awgeed marka laga bilaabo 16ka Febraayo 1982ka.

(Qod. 2aad)

In Sarkaal la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo Shareegu.

(Qod. 3aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 16.2.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.43 14 Apr. 1982 Dib ugu celin Boliiska EX. Gashaale Khaliif Axmed Absuge.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972 ee kl saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed,

MARKUU TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog.Po.3.82 ee 11.4.1982.

WUXUU XEERAY

(Qod. 1aad)

In Ex. Gaashaanle Khaliif Axmed Absuge ee hore uga tirsanaan jiray Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed dib loogu soo celiyo Ciidanka Boliiska marka laga bilaabo 1.4.82, isagoo shaqadiisu noqoneyso xagga muddada xiriir.

(Qod. 2aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 14.4.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 14.Abr. 1982 Wareejin Sarkaal.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xog.A. 12.82 ee 13.4.1982.

WUXUU XEERAY:

(Qod. 1aad)

In Gaashaanle Dhexe Calinuur Sahal Kooshin ee ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed si rasmi ah loogu wareejiyo Taliska Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed marka laga bilaabo 1.4.1982, isagoo ka mid noqonaya Saraakiisha Joogtada ah ee Taliska Nabadsugida.

(Qod. 2aad)

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada

Muqdisho, 14.4.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 45 taariikh meelmarinta Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah loogu tala galay Dhismaha Jidka Golween Jilib.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, xubintiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay, taariikh ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiska ujeedada ku qoran.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskaas.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay Heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan K.D.3.5 Milyan oo u dhiganta Sh. So. 151.903.100 oo loogu tala galay dhismaha Jidka Golween Jilib, Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 27.4.82.

(Qod. 2aad)

Heshiisku wuxuu ku yeelanayaa J.D.S. astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Waraaqaha meelmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12. Lul. 1982

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٥ بتاريخ ١٢ — ٧ — ١٩٨٢
التصديق على اتفاقية قرض اضافى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع طريق جلوين — جلب

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الرابعة من المادة ٧٢ من الدستور،
وعلى القانون رقم ٢٥ بتاريخ ١٢ — ٧ — ٨٢ والذى بموجبه وافق على الاتفاق السالف الذكر .
ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية المذكورة أعلاه .

يرسم

بما هو :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض الاضافى بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع طريق جلوين — جلب، المبرمة فى مدينة الكويت بتاريخ ٢٧ أبريل ١٩٨٢م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وينشر فى الجريدة الرسمية .

مقديشو ١٢ — ٧ — ١٩٨٢

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 46 ee 18 Lul. 1982 Magcaabid Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19ka Oktoobar 1970, kuna saabsan Dhismaha habka Abaalmarinta Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: In lagama maarmaan tahay in dib loo dhisó Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee Madaxtooyada J.D. Soomaaliya.

WUXUU XEEREEYAY:

(Qod. 1aad)

Laga bilaabo maalinta 4.7.1982, waxaa la magacaabay Xubnaha Guddiga Abaalmarinta Caadiga ah ee Madaxtooyada JDS, oo kala ah sidatan:

1. Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf
   — Guddoomiye

2. Guddoomiyaha Hog. Abaabulka iyo Kicinta XHKS
   — Ku-xigeen

3. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
   — Xubin

4. Wasiirka Dawladaha Hoose iyo HRM.
   — Xubin

5. Qof Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga Qa.
   — Xubin

6. Guddoomiyaha Xirii. Guud Ururada Sh. Soo/liyeed
   — Xubin

(Qod. 2aad)

Isla maalinta 4.7.1982, waxaa la baabi'iyay Guddigii hore ee Abaalmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkan wuxuu dhaqan galaya marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaanna lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah eeJDS.

Muqdisho, 18 Lul. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 10 Agoosto 1982 L. 1R8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Ganshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.47 ee 24 Luulyo 1982, Aqoosiga iyo joogteynta Kulanka BANDHIGGA AFRIKA EE FILIMADA IYO (Mogpafis). Bogga 653

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Buug Keyd L. 8657 ku qoran Maxamed Ismaaciil Yuusuf L. 211 » 661

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 138007 ku qoran Mar yan Sheekh Maxamuud L. 312 » 662

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 138011 ku qoran Mar yan Sheekh Maxamuud L. 313 » 663

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 138010 ku qoran Mar yan Sheekh Maxamuud L. 314 » 664

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 353244 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 315 » 665

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353243 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 316 » 666

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353248 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 317 » 667

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353246 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 318 » 668

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353247 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 319 » 669

QAYBTA LABAAD

XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, lambar 47 taariikh 18 Luulyo 1982, Aqoonsiga iyo joogteynta kulanka BANDHIGGA AFRIKA EE FILIMADA IYO SIMI NAARKA (Mogpafis).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Baaqii Shirkii ugu horreeyey ee Muqdisho lagu qabtay 12—20 Oktoobar 1981, kuna saabsanaa Bandhigga Afrika ee Filimada iyo Simi naarka (MOGPAFIS) oo si xoog leh ugu booriyey Dowladda Soomaaliyeed, Ururka Midowga Afrika Ururka Jaamacadda· Dawladaha Carbeed iyo Laanta Qaramada Midoobay ee Aqoonta iyo Dha qanka (UNESCO) inay Mogpafis u aqoonsadaan kulan dhaqmeed caalami ah oo ahmiyad weyn leh una qalma in la siiyo taageero buuxda oo maaddi iyo macnaawiba leh oo dammaanad u noqota jiri taanka iyo joogteynta Mogpafis.

MARKUU TIXGELIYEY: In MOGPAFIS NOQOTAY MUNAASIBADDII UGU HORREYSAY ee kulmi say filim sameyayaasha Afrika iyo Carabta oo ka kala yimid dalalka ku hadla afafka Carabiga. Fa ransiiska iyo Ingiriiska, kuwaasoo doonay inay ku soo fidiyaan Bartamaha iyo Bariga Afrika, waayo aragnimadii laga dhaxlay bandhigyada filimada ee lagu qabto Carthage (TUNIS) iyo Ogadugugu (Foltada Sare).

MARKUU TIXGELIYEY: Himilooyinka MOGPAFIS oo ay ka mid yihiin: xoojinta dhaqanka waddani ga iyo horumarinta isbeddelka bulshada, iskaashi ga carabta iyo Afrika si loo gaaro hab caalami ah oo cusub ee dhaqan dhaqaale, horumarinta is—ba heysiga filimada Afrika iyo xoojinta Hay'adaha Soomaaliyeed ee u xilsaaran shinematografiyada

ISAGOO GAROWSADAY: Baahida loo qabo in ras mi ahaan loo aqoonsado MOGPAFIS inuu noqdo kulan joogto ah oo caalami ah.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talo—bixinta Wasiirka Wa saaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweyna ha.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda

Qod 1aad

Bandhigga Afrika ee Filimada iyo Siminaarka (oo hadda ka dib loogu yeeri doono MOGPAFIS) waxaa loo aqoonsaday kulan—dhaqmeed si joogta ah loo qabto.

Qod. 2aad

1. Ujeeddada MOGPAFIS waa:
   a) Horumarinta isdhaafsiga fikradaha iyo waa ya—aragnimada filin-sameyayaasha Afrika iyo Carabta.
   b) Dhiirrigelinta wax wada qabsiga Afrika iyo Carabta ee dhinaca shinematografiyada si xal loogu helo dhibaatooyinka la xiriira keenista, qaybinta, soo saaridda canshuuridda filima da, tababaridda filin—sameyayaasha iyo daabi cidda xayeysiinta filimada.
   t) Dhiirrigelinta barashada iyo dhaafsiga dha qanka bulshada Soomaaliyeed iyo dhaqamada Afrika iyo Carabta kale.
   j) Horumarinta shinematograafiyada Soomaali yeed iyo wixii la xiriira.
2. Si loo hirgeliyo himilooyinka MOGPAFIS, wa

b) In uu gacan ka geysto abaabulidda, ama isagu qabto bandhigyo filin, shirar iyo ama simi ryo heer kastaba ah (waddani, laba (dal ama caalami).

t) In uu abuuro qayb keydis, faafisana warar ka iyo qoraallada la xiriira shinematograafiya da Dalka.

j) In MOGPAFIS iyo Wakaaladda Filimada Soo maaliyeed (W.F.S.) yeeshaan iskaashi jcogto ah dhinaca horumarinta shinematograafiyada Soomaaliyeed, gaar ahaanna xagga mashaa riicda iyo tababarrada.

x) Inuu qaado wixii tallaabooyin kale ah ee lagu hirgelinayo himilooyinka MOGPAFIS.

Qod. 3aad

Qaabka MOGPAFIS wuxuu ka koobnaan doonaa:

a) Golaha Hoggaaminta.
b) Guddiga Fulinta iyo
t) Guddiga Taageerada Caalamiga ah.

Qod. 4aad

1. Golaha Hoggaamintu wuxuu ka koobnaan doonaa:

) Wasiirka Wasaaradda Warfaafin ta iyo Hanuuninta Ummadda Guddoomiye

b) Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare G/kuxigeen.

t) Agaasimaha Guud ee Arrimaha Dibedda Xubin

j) Madaxa Hoggaanka MOGPAFIS khuseeya ee Xisbiga Hanti wadaagga K. Soomaaliyeed Xubin.

x) Maareeyaha Guud ee Wakaalad da Filimada Soomaaliyeed Xubin

goo ku tixgelinaya iskutaxlujin
tooda, aqoontooda iyo waayaarag
nimada ay u leeyihiin MOGPAFIS Xubno

2. Golaha Hoggaamintu wuxuu kulmi doonaa laba goor sannadkiiba. Haddii ay Guddoomiyaha la haboo naato ama ay ka codsadaan ugu yaraan laba Xubnood oo kale, wuxuu qaban karaa shirar aan caadi ahayn.

3. Guddoomiyaha iyo Saddex Xubnood oo kale ayaa shiri kara, go'aannada Goluhuna waxay ku ansi xi karaan afar cod, haddii codbixinta Xubnaha shira yaa is—le'ekaato, waxaa go'aanku noqonayaa hadba dhinaca codka Guddoomiyuhu jiro.

4. Guddoomiyuhu wuxuu Xubnaha Golaha u yaq binayaa qodobada shirka lagaga hadli doono ugu ya raan lix beri ka hor, haddii uu u oggolaado Guddoomi yuhu, Xubnaha kale waxay wax ku kordhin karaan qo dobada shirku ka hadli doono; Xoghayaha ayaa mas'uul ka ah qorista iyo keydinta qoraallada shirarka Golaha Hoggaaminta.

Qod. 5aad

Xilka Golaha Hoggaaminta wuxuu ka koobnaan doonaa:

a) Inuu tixgeliyo ansixinta barnaamijka iyo go' aamada Guddiga Fulinta ee MOGPAFIS;

b) Inuu Guddiga Fulinta ee MOGPAFIS ku taa geero fulinta hawlihiisa, hirgelinta ujeeddoo yinka MOGPAFIS, iyo inuu xaqiijiyo iskaashi ga looga baahan yahay in MOGPAFIS la yee sho Wasaaradaha, Wakaaladaha, Shirkadaha, iyo Hay'adaha Dalka iyo Ururada Caalamiga ah;

t) Inuu tixgeliyo arrintii kale ee Guddoomiyaha ugu muuqata inay wax ku ool u tahay himiloo yinka MOGPAFIS.

Qod. 6aad

a) Maareeyaha Guud ee Wakaalad da Filimada Soomaaliyeed Guddoomiye.

b) Guddoomiyaha Guddiga Waddaniga ah ee UNESCO Xubin;

t) Guddoomiyaha akadeemiyada Cilmi baarista, hiddaha iyo Dhaqanka Xubin;

j) Agaasimaha Telefishinka ee Wasaaradda War/finta iyo H.D. Xubin;

x) Maareeyaha Waaxda wax soo saarka iyo farsamada ee Wakaaladda Fili. Soomaaliyeed Xubin

kh) Maareeyaha Waaxda Ganacsiga ee Wak. Fili. Soomaaliyeed Xubin

d) Maareeyaha Waaxda Maamulka ee W. Filj. Soomaaliyeed Xog/Maaliyada

r) Maareeyaha Waaxda wax soo saarka ee Golaha Murtida iyo Madadaalada Xubin;

s) Saddex Xubnood oo Guddoomiyaha Golaha Hoggaamintu uu maga caabo, isagoo ku tixgelinaya isku taxalujintooda, aqoontooda iyo waaya aragnimo ay u leeyihiin MOGPAFIS Xubin;

2. Xoghayaha Guud ee Guddiga Fulinta waxaa Xubnaha Guddiga Fulinta ka dhex magacaabiya Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta.

3. Guddiga Fulintu wuxuu shirarkiisa ka soo qaybgelin karaa ilaa afar Xubnood oo kale oo aan cod lahayn haddii la bido xog ogaalnimo, aqoonyahanimo ama waaya aragnimo.

4. Guddiga Fulintu wuxuu kulmi karaa ugu yaraan mar saddexdii biloodba: Guddigu wuxuu xaalan kama

habboonaato ama ugu yaraan afar Xubnood oo kale ka codsadaan. Xoghayaha Guud ayaa mas'uul ka ah diiwaan gelinta doodaha iyo diyaarinta go'aannada shirarka Guddiga Fulinta ee xilka fulintoodu saaran tahay Guddoomiyaha.

5. Guddoomiyuhu wuxuu Xubnaha Guddiga Fulinta u qaybinayaa qodobada shirka lagaga hadli doono saddex beri ka hor.

Go'aan gaarista shirku waa hal dheeri, haddii codadku barbarro noqdaanna waxaa go'aanku noqona yaa hadba dhinaca Shir Guddoomiyuhu raacsan yahay. Wuxuu shirku ku ansaxayaa Guddoomiyaha iyo 5 Xubnood.

Qod. 7aad

Xilka Guddiga Fulinta wuxuu ka koobnaan doonaa:

1. Diyaarinta barnaamijka guud ee MOGPAFIS oo la hordhigayo Golaha Hoggaaminta;

2. Qorsheynta iyo qaybinta dhammaan martiqaad yada MOGPAFIS;

3. Xulashada Dalkii ama qofkii (amaba nooca fili mada) MOGPAFIS go'aansado in maamuusid iyo miligo gaar ahaaneed loo fidiyo;

4. Raadinta (gudo iyo dibaddaba) miisaaniyadda lagu wadayo hawlaha MOGPAFIS;

5. Dib u milicsiga iyo lafa guridda barnaamijka hawlaha MOGPAFIS;

6. Tixgelinta talo bixin ka iman karta gudaha ama dibadda oo lagu codsanayo in wax laga beddelo barnaamijka u degsan MOGPAFIS;

7. Tixgelinta arrintii kale oo Guddoomiyaha ugu muuqata inay wax ku ool u tahay himilooyinka MOGPAFIS;

Guddiga Taageeridda Caalamiga ah oo shaqadiisu ay noqon doonto talo siinta Guddiga Fulinta wuxuu ka koobnaan doonaa:

1. Guddoomiyaha Guddiga Fulinta Guddoomiye;
2. Xog. Guud ee Guddiga Fulinta Xoghaye Guud
3. Guddoomiyaha FEPACI Gud/k xigeen;
4. Guddoomiyaha Bandhigga Filima da ee Carthage Xubin;
5. Xoghayaha Guud ee FESPACO Xubin;
6. Xoghayaha Guud ee Fepaci Xubin;
7. Sagaal xubnood oo kale oo ay soo magacaagiin Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Guddiga Filimada iyagoo la tashanaaya Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta, kuna xulaaya Xubnaha aqoontooda, dadaalkooda iyo taageerada ay muu jiyaan Xubin;

Qod. 9aad

MOGPAFIS hantidiisu waxa ay ka kooban tahay sida soo socota:

a) Lacag Dawladdu ay miisaaniyaddeeda ugu darto ama deeq loo sgyo;

b) Kaalmo caalami ah oo si toos ah loogu soo gud biyo MOGPAFIS;

t) Dakhliga kale oo ka yimaada barnaamijyada MOGPAFIS iyo howlaheeda kale duwan.

Dakhliga MOGPAFIS waa in xisaab gaar ah looga furaa Bankiga Soomaaliyeed, loona maamulaa habka waafaqsan nidaam xisaabeedka u degsan.

Qod. 10aad

MOGPAFIS waa in uu u madaxbannaanaadaa qorshihiisa iyo socodsiinta hawlaha la xiriira hay-

amuur kasta oo lagama maarmaan ah, taas oo waafaq san Xeerkan.

Qod. 11aad

MOGPAFIS waa in ay ku xidhan tahay W. F. Si toos ahna ay u hoos timaadaa Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda oo awood u leh in uu ka soo saaro Xeer nidaamiye tifaftiran gaar ahaan arrimaha Maamulka iyo lacagta si loo dhaqan geliyo Xeerkan.

Qod. 12aad

Xeerkani waxaa uu ka mid noqonayaa xeerarka dalka, waxuuna dhaqan gelayaa maalinta Madaxweynaha J.D.S. uu saxeexo.

Muqdisho, 24 Luulyo 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar. ahaa 8657 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 6.368/= uu iska lahaa Maxamed Is maaciil Y. sida ku cad warqadda lam.———— taariikh 4.8.82 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka lam. 8657, oo ku qoran magaca Maxamed Ismaaciil Yuusuf ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 6.368.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dhexe u beddelo Maxamed Ismaaciil Yuusuf buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kad dib markay ka soo wareegto muddo, aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 311

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138007, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 42.000/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 006549, taa riikhdeedu 3.8.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Laanta Qeyq,XisaabiyahaGuud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (mortamento) Jeegga lam. 138007 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 42.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Mareeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 312

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138011 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50:000/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam: 006549 taariikhdeedu 3.3.1982 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xisaabaha Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam: 138011 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh: So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Mareeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maal mood maalinta lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138010, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 36.500/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 006549 taariikhdeedu 3:8.82 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xi-saabaha Guud:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 138010 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 36.500/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Ma reeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras-miga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 314

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353244 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga ahaa 353244 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So, 50.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahny 202 taariikhdeedu tahay 6.9.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeeg lam. 353244 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=,

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is horjaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 315

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353243 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50,000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 202 taariikhdeedu tahay 9,6,82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 353243 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 316

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353248 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lam. 202 taa riikhdeedu tahay 6.8.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Amortamento) Jeeg lam 353248 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 317

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353246 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 5.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lam. 202 taariikh. 9.6.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 353246 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanat Burco u bellelo Saciid Maxamel Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka lib markay ka soo wareegto muldo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 318

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 30 Agoosto 1982 L. 2 r 8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somalya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.


## K O O B N I I N

## S H A R C I

QAYBTA KOWAAD

W. M.

QAYBTA LABAAD

QAYBTA KOWAAD


SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qalabka sida. BOG. 671

SHARCI L. 27 ee 9 Agoos. 1982, Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Nabad gelyada ee Qaranka. » 674

SHARCI L. 28 ee 21 Agoos. 1982, Isbiddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1981. » 677

SHARCI L. 29 ee 21 Agoos. 1982, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1982. » 679

SHARCI L. 30 ee 21 Agoos. 1982, Oggolaanshaha Qorshaha Shana Sano ee 1982-shaha Qorshaha Shanta Sano ee 1982-1986.— » 682

QAYBTA LABAAD

XEER SHARCI L. 4 ee 11 Agoos. 1982, Dhoo finta Badeecado lagu soo beddeli karo Badeecado kale. » 683

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 14 Agoos. 1982, ku rogid Xukun deg deg ah, Gobolada iyo Degmooyinka Waddanka ee uu Cadawga Xabashidu soo weeraray » 687

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 49 ee 12 Agoos. 1982, Magacaabid Garsoore Maxkamadda C. Qalabka sida. » 689

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 12 Agoos. 1982, Magacaabid ku xigeen Xeer ilaaliye ee Ciidammada Qalabka sida. » 690

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.8.82, Lumid Buug Keyd L. 10098 ku qoran Xaawo Cali Cumar L. 320 » 691

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.8.82, Lumid Jeeg War. L. 516304 ku qoran Axmed Yaasiin Maxa/d L. 387 » 693

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.8.82, Lumid Buug Keyd L. 706 Ncr ku qoran Khadiija Maxamed Xuseen L. 388 » 694

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qalabka Sida.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 54aad X.H.C.C.D, ee Sharci Lamar 1 ee 31.3.1964.

MARKUU GARTAY: Baahida loo qabo in la dhiso Waaxyaha Maxkamadaha socda ee Ciidam mada waqtiga Dagaalka iyadoo lagu magacaabayo Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada lagana abuurayo Deegaannada Dalka ee loo aqoonsaday Goob Dagaal, kaddib markii Ciidammada (Xabashi da) si isdaba Joog ah ugu soo qaadeen weerar Cir iyo Dhulba Dalka Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYEY, In dhammaan Dalka Soomaaliyeed ee Xuduud la leh Dalka Xabashida loo aqoonsaday Goob Dagaal oo Xabashida iyo Huwanteedu si is daba joog ah u soo weerarayaan.

MARKUU ARKAY: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaarad da Gaashaandhigga.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Laga bilaabo 1.7.1982 waxaa la dhisay Afar waax socota ee Maxkamaddaha Ciidammada Qalabka sida ee Dagaalka laguna magacaabay «Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada» oo leh awoodda la xiriirta qaadista Dacwooyinka Dembiyada hoos yimaada waqtiga Dagaalka (Reati soggetti alla Giurisdizione Militare dI Gucrra), loona kala saaray qaybaha uu halganku ka socdo.

b— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood u leh qaadista Dacwooyinka Dembiyada ka dhaca inta u dhexeysa Aagagga Beled Weyne Dhuusa Mareeb.

j— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood u leh qaadista Dacwooyinka ka dhaca Qaybta 26ad

x— Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo awood u leh qaadista Dacwooyinka Dembiyada ka dhaca Qaybta 60aad.

Qod. 2aad.

Maxkamadda Ciidammada Xamar waxay u beddel meysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawl galeysaa inta u dhexeysa Cadaado Garoowe.

Qod. 3aad.

b— Maxkamadda Ciidammada Dh. Mareeb waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawlgaleysaa inta u dhexeysa Beled Weyne Dh. Mareeb.

t— Maxkamadda Ciidammada ee Qeybta 26aad waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan waxeyna ka hawl galeysaa inta ku siman Aagagga Qeybta 26aad.

j— Maxkamadda Ciidammada Qeybta 60aad waxay u beddelmeysaa Maxkamad Dagaal ee Ciidan, waxayna ka hawlgaleysaa inta ku siman Aagagga Qeybta 60aad.

Qod. 4aad.

Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada, fulinta hawlahooda, waxay ku dhaqmayaan Xeerka habka Ciqaabta Ciidammada ee Nabadda, Xeerka habka Ciqaabta Ciidammada ee Dagaalka iyo Nidaamka Garsoorka Ciidammada ee ku salaysan Sharci Lam. 1-2 ee 31.3.64

Qod. 5aad

Waxaa la tirtiray Xeerka Tirsigiisu yahay 54 Biis

Qod. 6aad.

Go'aannada ka soo baxay Maxkamadaha Ciidammada Qalabka sida ee ka horreeyey maalinta Shaciigaan la saxiixay, sidoodii ayaa loo hirgelinayaa.

Qod. 7aad.

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha.

Muqdisho, 14 Ago. 1982

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI Lambar 27 taariikh 9 Agoos. 1982
Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Naba dgelyada ee Qaranka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismaha Guddiga)

Waxaa la dhisay Guddiga Difaaca iyo Nabadgelya da ee Qaranka.

Qod. 2aad.

(Koobnaanta Guddiga)

Madaxweynaha J.D.S. Waa Guddoomiyaha Guddi ga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka, waxaana xubno ka ah Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga Hantiwa daagga Kacaanka Soomaaliyeed, Wasiirka Wasaarad da Gaashaandhigga, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 3aad.

(Waajibaadka Guddiga)

Waajibaadka Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka wuxuu yahay.

1. Inuu si joogta ah ula socdo, una qiimeeyo xaaladda Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka.
2. Inuu ka haqabtiro Ciidammada iyo Hay'adaha ka le ee u xilsaaran Difaaca iyo Nabadgelyada, had

3. Inuu si joogta ah ugu baraarujiyo Hay'adaha u xil saaran Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranka. guda shada waajibaadka.

4. Inuu kiciyo, Abaabulo, kuna baraarujiyo Shacbiwe ynaha Soomaaliyeed iyo Hay'adaha kale ee Qaran ka ka qaybqaadashada Difaaca iyo Nabadgelyada Dalka.

Qod. 4aad.

(Awoodda Guddiga)

Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu qaado tal laabokasta oo uu ku sugayo jiritaanka, midnimada iyo xasilloonaanta Qaranka, haddii laga reebo awoodaha gaarka u ah Madaxweynaha J.D. Soomaaliya.

Qod. 5aad.

(Shirka Guddiga)

1. Guddigu wuxuu Shirkiisa ku yeelanayaa meel kas too ka mid ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya, Bishii hal mar, markii ay xaaladda Difaa ca iyo Nabadgelyada Dalku caadi tahay.

2. Mar kasta oo ay jirto baahi ka dhigaysa lagama maarmaan, Guddoomiyuhu si deg deg ah ayuu isu gu yeeri karaa Guddiga, isaga ayaana xaddida ka ltanka Shirka.

Qod. 6aad.

(Guddi Hoosaad)

Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada Qaranku wu xuu yeelan karaa Guddi Hoosaa.

Qod. 7aad.

(Shirka Guddi Hoosaadka)

Guddigi Hoosaadku wuxuu shiraa markii ay xaa laddu caadi tahay 15kii maalmoodba mar, iyadoo Gud doomiyaha Guddi Hoosaadku tilmaamayo meesha la gu shirayo, wuxuuna warbixintiisa iyo soojeedintiisa u soo gudbinayaa Guddoomiyaha Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada ee Qaranka.

Qod. 8aad.

(Burin)

Sharci kasta oo kan ka horreeyey oo ka hadlaya arrintan waa la buriyey.

Qod. 9aad.

(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 28 taariikh 21 Agoos. 1982
Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 81.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

Qod. 1aad

(Isbeddelka Miisaaniyadda)

Waxaa la oggolaaday Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1981, sida ka muuqata Lifaaqa A iyo B ee Sharcigan.

Qod. 2aad.

(Dhaqan galka)

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 21 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

LIFAAQA «A»

| Madax-xige | Tilmaan | Qiyaasta Hore | Isbeddelka | Qiyaasta |
|---|---|---|---|---|
| 7.1.1. | Dakhliga lama filaanka ah | — | 800.000.000 | 800.000.000 |

LIFAAQA «B»

| Madax | Madax-xige | Tilmaan | Qayaasta Hore | Isbeddelka | Qaybta Cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.3.0. | Was. Maaliyadda | | | | |
| | 1.2.8. (r) | Korsaarka Deynta | 42.000.000.00 | 10.702.102.67 | 52.702.102.67 |
| | 1.2.8. (s) | Kharajka kala duwan | 455.000.000.00 | 318.256.475.74 | 773.256.475.74 |
| | 6.1.0. (t) | Bixinta Deynta Dibad | 25.000.000.00 | 38.917.401.48 | 63.917.401.48 |
| | | | 522.000.000.00 | 367.875.979.89 | 889.875.979.89 |

SHARCI Lamb. 29 taariikh 21 Agoos.1982
Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 82.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaansha Golaha Sha cbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

Qod. 1aad

(Isbeddelka Miisaaniyadda)

Waxaa la oggolaaday Isbeddelka 1aad ee Miisaa niyadda 1982, sida ka muuqata Lifaaqa A iyo B ee Sharcigan.

Qod. 2aad.

(Dhaqan galka)

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saa rayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 21 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

LIFAAQA DAKHLIGA

| ge | Tilmaan | Qaybta Hore | Isbeddelka | Qaybta Cusub |
|---|---|---|---|---|
| | Canshuurta Diridda Alaabta | 16.000.000.00 | 34.000.000.00 | 50.000.000.00 |
| | » » Diwaangelitna | 60.000.000.00 | 80.000.000.00 | 140.000.000.00 |
| | » » Moorka | 157.000.000.00 | 33.000.000.00 | 190.000.000.00 |
| | » » Kale ee Dadban | 8.000.000.00 | 85.000.000.00 | 93.000.000.00 |
| | » » Buuriga iyo Tarraqa | 30.000.000.00 | 25.000.000.00 | 55.000.000.00 |
| | » » Caadiga ah ee Shaqal. | 35.000.000.00 | 24.000.000.00 | 59.000.000.00 |
| | » » Macaashka | 5.200.00.00 | 27.000.000.00 | 32.200.000.00 |
| | Ganaaxa iyo wareejinta kale ee qas | 1.000.000.00 | 18.290.299.89 | 19.290.299.89 |
| | Canshuurta Teleefoonada | 6.000.000.00 | 17.009.000.00 | 23.000.000.00 |
| | Dakhliga kale Alaabta iyo Hawsha | 3.000.000.00 | 24.585.680.00 | 24.885.680.00 |
| | ISUGEYN | 318.500.000.00 | 367.875.979.89 | 686.375.979.89 |

| | | Qiyaasta Hore | Isbeddelka | Q |
|---|---|---|---|---|
| LIFAAQA «B» | | | | |
| KHARASHKA | | | | |
| W./Maaliyadda | | 42.000.000.00 | 10.000.000.00 | 52. |
| 2.2.8. (r) | Korsaarka Deynta | 450.540.096.00 | 750.000.000.00 | 1.100. |
| 1.2.8. (s) | Kharashka kala duwan | 25.000.000.00 | 40.000.000.00 | 65. |
| 6.1.0. (t) | Bixinta deynta dibedda | | | |
| | ISUGEYN | 517.540.096.00 | 800.000.000.00 | 1.217. |

SHARCI Lam. 30 taariikh 21 Agoos. 1982 Oggolaashaha Qorshaha Shanta Sano ee1982—1986.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo socda:

Qod. 1aad.

(Qorshaha)

Waxaa la oggolaaday Qorshaha Shanta Sano ee 1982—1986, sida ka muuqata Lifaaqa Sharcigan.

Qod. 2aad.

(Dhaqan galka)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 21 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER SHARCI Lam. 4 taariikh 11 Agoos. 1982 Dhoofinta Badeeco lagu soo bed deli karo Badeeco kale.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Go'aankii Golayaasha ee ku saa san dib u habeynta dhaqaalaha, qaybta dhiirrige linta Ganacsiga Bibadda.

MARKUU ARKAY: Barnaamijka Dawladda ee Gola ha Shacbiga Qaranku ku ansixiyey Kalfadhigisii Koowaad, qayba ku saabsan Ganacsiga Dibedda.

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan anay in la qaado tillaabo kasta oo u horseedeysa horu marinta alaabta dibedda loo dhoofiyo, si ay u koro dho awoodda Lacagta Adag ee Dalka.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay habboon tahay in hi rgelinta taladaas deg deg loo fuliyo, laguna jidee yo Xeer Sharci si dib u dhac looga furto.

MARKUU TIXGELIYEY Soo jeedinta Wasiirada Wa saaradda Ganacsiga, Maaliyadda iyo Kalluunka.

DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharciga soo socda:

Qod. 1aad.

1. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, isagoo dhegeys tay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasiir kii kale oo ay arrintu khuseyn karto, wuxuu awood u leeyahay inuu fasaxo dhoofinta Kalluun ka qalalan, alaabta Farshaxanka (tan Gacanta la gu sameeyo ama Badda laga soo saaro) Cusbada iyo Badeecadaha kale ee yar yar ee Dalka laga soo saaro.
2. Badeecadaha habkan lagu dhoofiyey, qiimahooda oo Lacag Adag ah waxaa lagu soo celinayaa Dalka muddo cayiman gudaheeda.

3. Dhoofiyuhu wuxuu qiimaha Badeecadda ku keeni karaa alaab ay ka mid yihiin: Bun, Bateriga Raadi yaha, Xawaaji (Qorfe, Hayl, Sanjabiil Filfil Toon IWM) Bataato iyo qalabka Kalluumeysiga.

4. Badeecadaha ku qeexan faqradda hore waxaa laga keenayaa oo keliya Dalalka loo dhoofiyey Kalluun ka qalalan, alaabta farshaxanka, cusub, IWM.

Qod. 2aad.

Fasaxa dhoofinta ee Wasaaradda Ganacsiga waa in lagu sheegaa qiimaha badeecadda la dhoofinayo iyo muddada qiimahaas lagu soo celinayo, Lacag Adag ah aan ama Badeecada ahaan.

Qod. 3aad.

Badeecadaha ku tilmaaman Qod. 1aad, Faqradda 3aad ee Xeer Sharcigan waxay Dalka ku soo gelayaan sicirka caalamiga ah ee Badeecadda, dadweynahana waxaa looga Iibinayaa sicirka marba ay u goyso Wasaa radda Ganacsigu.

Qod. 4aad.

Haddii qiimaha Badeecadda Ganacsaduhu Dibedda ka keenay uu ka badan yahay qiimaha Badeecaddii uu Dibedda u dhoofshay, inta farqiga ah waxaa loo qaada nayaa in Dalka lagu soo geliyey ICTIMAAD LA'AAN, waana lala wareegayaa iyadaoo aan Ganacsadaha la siin wax magdhaw ah.

Qod. 5aad.

1. Ganacsadaha loo fasaxo dibad u dhoofinta Badeeca daha ku tilmaaman Qod. 1aad ee Xeer Sharcigan, wuxuu dhigayaa curaar damaanad ah.
2. Haddii uu Dalka ku soo celin waayo qiimaha Badee cadda uu dhoofiyey waqtigii loo qabtay gudihiisa, curaarta waxaa la wareegeysa Wasaaradda Maa liyadda.

3. La wareegidda curaarta kama reebeyso dhoofiyaha Ciqaabta ku tilmaaman Qod. 10aad ee Xeer Sharci gan.

Qod. 6aad.

1. Wasaaradda Ganacsigu, iyadoo la tashatay Wasaaradda Maaliyadda, waxay u dejineysaa Fasaxa Badeecadaha habkan lagu dhoofiyo qaab gaar ah oo lagu tilmaamayo Shuruudaha dhoofinta, muddada soo celinta qiimaha Badeecadda, muddada Fasaxa dhoofintu dhaqangal yahay, Dekadda laga dhoofinayo, magaalada ay ku socoto, gaadiidka lagu qaadayo, IWM.

2. Si kastaba ha ahaatee, muddada dhaqangalka fasaxu kama badnaan karo Saddex Bilood oo hal mar la cusbooneynsiin karo intaa in la eg.

Qod. 7aad.

Hubinta isweydaarsiga alaabtani iyo ilaalinteeda waxaa loo xil saaray Wasaaradda Ganacsiga, Wasaaradda Maaliyadda iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Qeybta ilaalinta Canshuuraha, oo Saddexdii Biloodba mar tirakoob ka sameyn doona si loola socdo heerka wax isdhaafsiga Ganacsiga habkani uu marayo.

Qod. 8aad.

1. Wasiirada Wasaaradaha Ganacsiga, Maaliyadda iyo Kalluunka waxay G̊o'aan ka gaarayaan xallinta fasaxyadii Badeecad dhoofintahabkan ku saleysan ee la baxshay inta aan la joojinin wax ku keenidda habka ictimaad la'aanta (F.V.) Dalkana aan dib loogu soo celinin Badeecad u dhiganta qiimaha Xoolihii la dhoofshay.

2. Badeecadaha la oggolaan karo Ganacsatada kor ku tilmaamanin ay Dalka soo geliyaan waa kuwa ku sheegan Qod. 1aad, Faqradda 3aad ee Xeerkan Sharci.

Qod. 9aad.

Wasiirka Wasaaradda Ganacsigu wuxuu Lixdii bil loodba Golaha Wasiirrada warbixin ka siinayaa dhaq-dhaqaaqa Ganacsiga ee Sharcigan ka aloosmay heerka uu joogo iyo waxa uu ku kordhiyey awoodda Lacagta Adag ee Dalka.

Qod. 10aad.

Dhoofiyihii ku soo celin waaya Dalka qiimaha Badeecaddii uu dibedda u diray muddada loo qabtay guda heeda, Lacag Adag ahaan ama Badeeco ahaan, wuxuu la mid yahay qof sharci darro Dalka uga saaray Badee cad, waxaana lagu qaadayaa Sharciga tirsigiisu yahay 54 ee 1da Jennaayo 1975.

Qod. 11aad.

Xeer Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 11 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

MARKA MADAXWEYNAHA JDS Lam. 48 taariikh 14 Ago. 1982 ku rogid Xukun deg deg ah. Goboladda iyo Degmooyinka Waddanka ee uu Cadawgu Xaba shidu soo weeraray.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU OGAADAY: In qeybo ka mid ah Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, si qaraar oo isdabajoog ah ay Ciidamada Xabashiduweera ro Dhul iyo Cirka leh ugu soo qaadeen, una geysteen Dadweynaha Soomaaliyeed Khasaarooyin isugu jira Maal iyo Nool.

MARKII: La xaqiijiyey in qeyb ka mid ah Dalka Soomaaliyeed ay qabsatay Xabashidu.

MARKUU GARTAY: In Baahi loo qabo in la sameeyo Sharci Waafaqsan xaaladda Dagaal ee abuurantay isagoo la tashaday Guddiga Difaaca Qaranka.

ISAGOO CUUKAHAYA: Awoodda Dastuurka siinayo ee ku Xusan Qod. 83aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 38aad ee Dastuurka J.D.S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad.

Goboladda iyo Degmooyinka Waddanka ee uu Cadawga Xabashidu soo weeraray waxaa lagu soo rogay Xukun deg deg ah maadaama loo aqoonsaday inay ku jiraan Xaalad Dagaal.

Qod. 2aad.

Wasaaradda Gaashaandhigga ee J.D.S. iyo Taliye-

Qod. 3aad.

Qof kasta oo Soomaali ah waxaa ku waajib ah, had dii loo baahdo, inuu si toos ah, ama dadban, ugu qeyb qaato, naf iyo Maalba, Difaaca Qaranka, meel kasta iyo mar kastaba haddii loogu yeero.

Qod. 4aad.

Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Ciidamadda Qalabka sida ee G/ha Dagaalka ku jira iyo kuwa taakulee yaba, waxay awood u leeyihiin in ay la wareegaan, ku meel gaar ahaan, wax allaale iyo wixii Hanti gaarta ama maguurto ah ee taakuleen u noqon karta Difaaca Waddana, iyadoon Sharci lagu xad gudbeynin.

Qod. 5aad.

Qof kasta oo ku kaca ama isku daya ficil bililiqeysi ah, isagoo ka faa'iideysanaya gurmadka loogu jiro Difaaca Dalka, waxaa lagu qaadayaa Ciqaabaha ku qoran Xeerka Ciqaabta Ciidamada waqtiga Dagaalka.

Qod. 6aad.

Shuruudaha Ciidamada ee waqtiga Dagaalka si toos ah ay u dhaqan geliyaan lagu billaabo 1da Luulyo 1982.

Qod. 7aad.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Luulyo 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lamb. 49 ee Magacaabid Garsoore Dr. Saciid Axmed Kediye, Maxkamadda C.Q.S.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY; Qo. 102 ee Dastuurka Qaranka.

MARKUU ARKAY: Nidaamka Garsoorka C.Q.S. Qodobkiisa 2aad iyo 4aad ee soo baxay 31.3.1964.

MARKUU GARTAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Garsoore Maxkamadda C.Q.sida.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Ra'yiga waafaqsan ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida.

WUXUU GO'AANIYEY

Qod. 1aad

Gaashaanle Dr. Saciid Axmed Kediye, oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, waxaa loomagacaabay Garsoore Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 2aad.

Go'aankani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynuhu. waxaana lagu soo saarayaa Taafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lamb. 50 ee taariikh 12 Ago. 1982, Magacaabid Ku—Xigeen Xeer ilaaliye Ciidamada Qalabka Sida.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod .102 ee Destuurka Qaranka.
MARKUU ARKAY: Nidaamka Garsoorka C.Q.S. Qodobkiisa 3aad iyo 5aad ee soo baxay 31.3.1964.

MARKUU GARTAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Ku-xigeen Xeer ilaaliye C.Q.S,
MARKUU TIXGELIYEY, Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Ra'yiga waafaqsan ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare C.Q.S.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

L/Xiddigle Cabdi Jaamac Xirsi waxaa loo magacaabay Ku-xigeen Xeer ilaaliye Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 2aad.

Go'iinkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Ago. 1982

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA J.D.S.

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug. Keyd Dhumay oo Lamb. ahaa 10098, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd Lacag dhan Sh. So. .1,000 uu iska lahaa Xaawo Cali Cumar sida ku cad Warqadda Lamb. taariikh 14.8.82 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9,9,65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keydka Lamb. 10098 oo ku qoran magaca Xaawo Cali Cumar ayna ku jirto Lacg dhan Sh, So, 1.000/

WUXUU FASAXAY

